

# KAALMADA DHAQAALE EE KRAKEN COMMUNITY ICEPLEX

Mu'asasada One Roof Foundation waxaa ka go'an in ay wax-ka-qabato caqabadaha ku gedaaman ka-qaybqaadashada ciyaaraha isboortiska barafka. Annaga oo abuureyna bulsho ka dhigeysa kala duwanaanshaha, sinnaanta, u dhammaanshaha udub-dhexaadka dedaalka aan ku kobcineyno ciyaarta, ayaa waxaannu ballaarineynaa helidda barnaamijyada ka jira xarunteenna ee loogu talagalay dhammaan qoysaska. Waxaan kaashaneynaa iskuullada iyo ururrada bulshada si aan ula xiriirno qoysaska dakhligooda hooseeya iyo dhallinyarada midowga ah oo ah qayb ka mid ah istiraatiijiyad dhammeystiran oo degaanka looga dhisayo dhaqanka ciyaaraha barafka oo loo siman yahay loona dhan yahay.

Kaalmo dhaqaale ayaa loo heli karaa barnaamijyadan soo socda ee ka jira Kraken Community Iceplex:



## BARO SIDA BARAFKA LOOGU TARAARAXO

Barnaamijka Baro Sida Barafka Loogu Taraaraxo ee Kraken (Learn to Skate) waxaa loogu talagalay in lagu soo dhoweeyo ardeyda aaney horey u lahayn waayo-aragnimada ciyaaraha barafka ama ku taraarixidda barashada ee deegaanka garoonka barafka ah. 8-toddobaad ayaa waxaa diiradda lagu saari doonaa fikradaha baraf ku taraarixid-da aasaasiga ah si ardeyda ay u bartaan sii wanaajinta is-dheellitirka iyo isuduwidada ee barafka inta la sii baranayo sida barafka loogu taraaraxo.



## BARO IN AAD CIYAARTO

Kadib dhammeysashada Barnaamijka Baro Sida Barafka Loogu Taraaraxo (Learn to Skate), ardeyda waxay ku biirri doonaa Barnaamijka Baro in Aad Ciyaarto (Kraken Learn to Play program) halkaasi oo ay ku baran doonaa xirfadaha aasaasiga ah ee ciyaaraha barafka sida tuuryada, ka gudbidda, iyo qabsashada usha, iyaga oo sii kobcinaya xirfadahooda baraf ku taraarixidda. Ardeyda waxay bilaabi doonaa ka qaybgalka ciyaaraha goobta yar inta ay sii wadayaan guud ahaan horumarka ay ku noqonayaan ciyaartoyda ciyaaraha barafka.



## EMERALD EDGE

Emerald Edge waa barnaamijkeenna isku-xirka e loogu talagalay ciyaaryahannada barafka ee ka soo gudbey barnaamijka Baro Sida Barafka Loogu Taraaraxo (Learn to Skate) una sii gudbaya Ciyaarta Barafka ee Figure Skating. Waxaan adeegsanaa Barnaamijka Aspire ee U.S Figure Skating annaga oo ku dareyna tamarteenna iyo jawigeenna ee Kraken. Ciyaartoyda barafka ku taraaraxa ayaa la shaqeyn doonna kooxda tababarayaasheenna xirfadlayaasha ah si ay u bartaan oo ayna u kobciyaan xirfadaha ay ka mid yihiin isbeddellada, iswareejiska, boodista iyo in kale oo dheeraad ah!



## JR SQUID

Barnaamij kobcineed oo guri gudahiisa ka dhaca oo loogu talagalay carruurta 5-9 sano jirka ah si ay ugu diyaar-ga-roobaan ciyaarta horyaalka Jr Kraken. Ciyaartoyda ayaa loo kooxeyn doonaa si ku saleysan da'dooda waxayna tababar-qaadan doonaa laba jeer toddobaadkii (habeen toddobaad + maalin Sabti ama Axad ah). Saddex ikhtiyaarood oo aad kala dooran karto:

- Xilli ciyaareed dhan (Sibtembar-Maarso)
- 1/2 xilliyeed Dayrta 2022 (Sibtembar-Disembar)
- 1/2 xilliyeed Jiilaalka 2023 (Jannaayo-Maarso)



JR KRAKEN

## JR KRAKEN

Ciyaar tartan ah oo loogu talagalay ciyaartoyda khibrada leh ee ay da'doodu ka yar tahay 8U, 10U, 12U iyo 14U oo ah qayb ka mid ah Horyaalka Ciyaaraha Barafka ee Nawaaxiga Magaalada Weyn. Ciyaartoyda ayaa waxaa loo qoondeyn doonaa kooxda ku habboon iyada oo lagu saleynayo heerka xirfadada iyo da'da.

- Xilliga: Bartamaha-Sibtembar ilaa bartamaha-Maarso
- Tababar-qaadashooyinka: laba-jeer toddobaadkii maalmaha toddobaadka iskuulka ka-dib waxaanna lagu qaadan doonaa Kraken Community Iceplex.



## XEROOYINKA IYO RUGAHA CAAFIMAADKA

Xerooyinka waxay bixin doonaa fursado tababar madadaalo leh, cusub, oo gaar ah. Ka-qaybgalayaasha waxay heli doonaa fursad ay isugu dayaan farsamooyin cusub, kor ugu qaadayaan xirfadaha jira, kula kulmayaan carruur cusub, oo ayna wax uga baranayaan macallimiin aqoontoodu sarreyso.

Dhammaan ka-qaybgalayaasha cusub ee Kraken Community Iceplex waa in ay ka soo bilaabaan fasalka baro Sida Barafka Loogu Taraaraxo (Learn to Skate) ka hor inta aysan u gudbin barnaamijyada kale.

Mu'asasada One Roof Foundation waxaa ka go'an in ay caawiso codsadayaal badan intii suuragal ah. Iyadoo sabab u ah tirada badan ee codsiyada iyo kheyraadka kooban, ma awoodno in aan maalgelin ku abaalmarinno dhammaan ka-qaybgalayaasha.

Deeqaha waxaa lagu soo koobayaa ka-qaybgalayaasha ay da'doodu ka yar tahay da'da 18 sano.



SCAN TO APPLY